

**Telefoonka dumarka dhalaya ee la dhigayo Isbataal yaraha dumarka (Kvinneklippen)
Dhammaan dumarka dhalay a waa inay ka hor intaysan soo aadin Isbataalyaraha dumarka
ay soo wacaan telefoonka soo socda ee ah midka dumarka la seexinayo:**

55 97 22 00

Telefoonka dumarka dhalayo ee la seexinayo waxaa ka jawaabaysa ummuliso khibrad leh. Hadalkaaga ayay dhegeysanaysaa, talo ayay ku siinaysaa kulana qorsheyneysaa waxa danbe ee dhici doona.

Telefoonka dhigista waxaa loogu talo galay dhibaatooyinka ku soo boodka ah (wuxuu u dhigmaa telefoonka qayladhaanta ee: 113). Waannu ka xunnahay, laakiin adeegaan uma isticmaali kartid talo bixin dib loo dhigi karo oo lagala hadli karo dhakhtarkaaga, ummuliso ama dhakhtarka heeganka ah. Waxaa sidaas darteed dhacda inaan kuwaas aad ku niraahno, marka dhibku yahay mid halkaa lagu xallin karo.

Goorma ayaa la wacayaa telefoonka dhigista ee dumarka dhalaya?

Telefoonka dhigista waxaa caadiyan loo isticmaalayaa si loo soo sheego in fooshi billaabatay oo aad Isbataalyaraha u soo socoto. Markaa ayay qaybta aad ku dhalayso qorshaynaysaa sidii ay kuu qaabbili lahayd, oo waxaa lagu diyaarinayaa qolkii aad ku dhali lahayd iyo ciddii mas'uulka ka noqon lahayd qaabiliddaada iyo la socoshadaada.

Haddii aadan hubin in fooshi billaabatay, ama uu isbeddel kugu dhacay ama aad ilmaha u welwelsan tahay, waxaad ummuliso kala xiriiri kartaa telefoonka dhigista.

Maxaa loo soo qaadanayaa Isbataalyaraha dumarka?

Had iyo jeer soo qaado:

- Kaarka caafimaadka ee dumarka uurka leh
- Jawaabta nooca dhiigga – Jawaabta dhiigga Rhesus
- Warbixinta Ultralyd-ka
- Jawaabaha baaritaannada kale
- Wixii kale ee waraaqo ah oo la xiriira uurkaan, kuwii hore iyo wixii dhalmo hore ah
- Daawooyinka joogtada loo qaato – haddii aad wax daawo ah qaadato, waa inaad kuwaas u soo qaadataa qaybta dhalliinka. Waa inaad had iyo jeer sheegtaa wixii daawo ah oo aad isticmaasho.

Maxaa dhaca marka lagu qaabbilo?

Sababta aad u timid Isbataalyaraha dumarka ayay ku xirnaanayaan baaritaannada, la socoshada iyo daaweynta dhici doona. Waa lagula socodsiin doonaa waxa dhici doona, had iyo jeerna waad dhiiban kartaa wixii su'aal ah ee aad qabtid.

Baaritaanka marka lagu qaabbilo wuxuu noqonayaa mid ka badan koontaroolkii uurka, annagoo koontarooli doonna:

- Caloosha hooyada si aan u ogaanno siduu ilmuhu u jiifo, inta uu ilmuhu la eg yahay + koontaroolno nabar fool
- Sanqarta ilmaha ayaa la koontaroolayaa
- Biyaha ilmaha ku wareegsan ayaa la hubinayaa – inay furmeen iyo in kale
- Gudaha hooyada ayaa la baarayaa si loo eego meesha uu ilmuhu soo gaaray +iyo in nabarka fooshu furay dhuunta ilmagaleenka
- Cadaadiska dhiigga ayaa la koontaroolayaa
- Tijaabo kaadi ayaa haddii loo baahdo la qaadi
- Garaaca wadnaha + iyo heerkulka ayaa la koontaroolayaa
- Haddii calooshu ku fadhiday oo ay taasi dhib kugu haysay waxaa lagaa caawin karaa inaad caloosha mariso.

Haddii ay ummulisada iyo dhakhtarku muhiim u arkaan waxay qaadi doonaan baaritaanno kale: tusaale ahaan ultralyd, raajo iyo tijaabooyin dhiig.

Tijaabooyinka la qaado ayay ku xirnaan doonaan wixii kale ee la qabanayo.

Amming (Somali)



<http://ammehjelpen.no/ammevideoer/somali>